# KULANKA RASMIGA AH EE GUDDIGA DUGSIGA BOSTON
# GUDIGA AQBELIDA IMTIXAANAADKA SKUULADA

**Maajo 18, 2021**

Guddiga Uxil saaran Qaabilaadda Imtixaanka skuulada ee Dugsiyada Boston ayaa qabtay shir fog Maajo 18, 2021 markay ahayd 5 galabnimo qaabka aragti kulan e Zoom. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan mid ka mid ah waxyaabahan hoos kutaxan, booqo https://www.bostonpublicschools.org/esataskforce, emailka feedback@bostonpublicschools.org ama wac gudiga skuulka Boston (617) 635-9014.

## KA QEYB GALAYAASHA

Gudiga Diwaangilinta Imtixaanka Dugsiga Xubnaha Xaadirka ah: Shir gadoomiye Michael Contompasis; Shir Gadoomiye Tanisha Sullivan; Samuel Acevedo; Acacia Aguirre; Katherine Grassa; Matt Cregor; Zena Lum; Zoe Nagasawa; Rachel Skerritt; Rosann Tung; iyo Tamara Waite.

Gudiga Aqbalida Imtixaanaadka Dugsiga Xubnaha Maqan: Simon Chernow; iyo Tanya Freeman-Wisdom.

Shaqaalaha hadda ee Dugsiyada Dadweynaha Boston: Monica Roberts, Madaxa Ardayda, Horumarka Qoyska iyo Bulshada; iyo Monica Hogan, Agaasimaha Sare ee Xafiiska Xogta iyo La Xisaabtanka.

## Dukumentiyada la soo bandhigay

Ajendaha

Daqiiqadaha kulanka: Maajo 11, 2021 kulanka

Bandhigida: War-gilinta Diwangilinta Imtixaanka Dugsiga: , Maajo18, 2021

## Codsiga Bilaabitaanka Shirka

Mudane Contompasis ayaa ugu yeeray kulanka in la bilaaba. Wuxuu ku dhawaaqay in adeegyo tarjumaad isku mar ah lagu heli karo Isbaanish, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin, Portuguese, Somali, Arabic, iyo Luuqada Ishaarta ee Mareykanka (ASL); tarjumaanada ayaa isbaray kaqeyb galayaasha, waxayna ku bixiyeen tilmaamo afkooda hooyo sida loo helo turjumaad isku mar ah iyagoo badalaya kanaalka Aragti kulanka.

Ms. Parvex ayaa yeerisay liiska. Mudane Chernow iyo Diktoor Freeman-Wisdom way maqnaayeen. Mudane. Acevedo, Marwo. Aguirre, iyo Marwo. Waite ayaa yimid kadib yeeritaanka.

## Ansixinta Daqiiqadaha Kulanka: Maajo 11, 2021

***Waa la ansaxiyey* –** Kooxda Gudiga waxay si aqlabiyad leh ku ansixiyeen daqiiqadihii shirkii Guddi-hawleedka Ogolaanshaha Imtixaanka Dugsiga ee Maajo 11, 2021.

## Bandhigid:

Monica Roberts, Madaxa Ardayda, Horumarka Qoyska iyo Bulshada, iyo Monica Hogan, Agaasimaha Sare ee Xafiiska Macluumaadka iyo La Xisaabtanka, ayaa dib u eegay xog dheeri ah oo ay soo codsadeen Gudi-howleedka, oo la xiriirta natiijooyinka aqbalaadda ee imtixaanka Dugsiyada Sannad Dugsiyeedka 2021-2022.

Marwo Roberts ayaa kubilaawdi soo bandhigida jawaabaha su aalaha la waydiiyay ee laxidhiidha Waaxda Dugsiyada Hoose iyo Sare ee Massachusetts (MA DESE). Waxay sheegtay in Waaxda Hoose ee Massachusetts ay uruuriso oo keliya xogta isqorista iskuulada aan dawliga ahayn. Su'aasha ku saabsan fasalada kala-duwan ee dugsiyada imtixaanka, waxay sheegtay in Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah uu la shaqeynayo hogaamiyaasha iskuulka, iskuuladana Shaqaala loo qori doona sii loo bixiyo adeegyo, oo ay ku jiraan qorshooyinka waxbarashada shaqsiyeed ee ardayda (IEP) iyo haddii loo baahdo in fasal si gaar ah u kala duwan , taasi waa la bixin doonaa.

Marwo Hogan waxay bixisay war-gilin ku saabsan Tirakoobka Tacliinta, ka dibna waxay ku sii darsatay xog dheeri ah oo ku saabsan casuumaadaha imtaxaanka skuulada, gaar ahaan tirada casuumaadaha skuulka iyo arday kooxeedka fasalada 7aad iyo 9aad.

Marki xiktey, Marwo Hogan waxay soo bandhigtay tirada casuumaadaha ardayda dhaqaale ahaan tabarta yar ee zip code ee fasalka 7aad iyo 9aad markii loo fiirsha isbarbardhig labo sano ah. Ms. Hogan waxay xustay in si loo ilaaliyo sirta ardayda, markay ay kala soocayaan astaamo badan, shaqaaluhu waxay xakameeyeen macluumaadka.

Marwo Roberts waxay soo bandhigtay boqolkiiba casuumaadaha nambarka zip ah iyo nooca dugsiga ee fasalka 7aad iyo 9aad labadii sano ee la soo dhaafay. Waxay sidoo kale soo bandhigtay Qeybinta Celceliska Dhibcaha Darajadaa (GPA) ardayda la martiqaaday ee fasalka 7aad iyo 9aad.

Marwo Sullivan waxay weyddiisatay inay suurtagal tahay in la helo xogta nambarrada zipka ah ee ka yar 10 casuumaad. Waxay sheegtay inay fahansanta walaaca qarsoodiga ah, laakiin ay rabto inay ogaato sida ay weli u heli karaan dareen ah sida xogtaasi u ekayd.

Marwo Hogan waxay ka jawaabtay codsigii ku saabsanaa imisa dugsi Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) oo aan lahayn wax arday ah oo casuumaad ka helay SY21-22. Fasalka 7aad, waxaa jiray afar iskuul oo DDB ah oo aan lahayn wax arday ah oo casuumaad helay, oo matalaaya 13 codsade guud ahaan. Fasalka 9aad, waxaa jiray labo iskuul oo DDB ah oo aan lahayn wax arday ah oo casuumaad helay, oo matalaaya 6 codsadayaal. Dugsiga McKinley ma lahayn codsadeyaal fasalka 7aad ama 9aad, iyo dugsiga Horace Mann ma lahayn codsadeyaal fasalka 9aad.

Ms. Skerritt waxay weydiisay soo-bandhigayaasha haddii ay hayaan xog-ururin falanqeyn ah oo ku saabsan GPA Nambar Zip ahaan. Marwo Roberts waxay sheegtay in fasalka 7aad, inta badan GPAs ay

ahaayeen B + lagu daray ama ka sareeya darisyada. Intooda badan waxay u dhaxeeyeen B + iyo A-. Celceliska ugu hooseeya ee dhinaca darisyaasha wuxuu ahaa aagga B lagu dari. Marwo Hogan waxay cadeysay in dhamaan ardayda leh GPA dhameystiran, oo ah 12, ay heleen casuumaad dugsiga imtixaanka. Fasalka 9-aad, celceliska GPA ee jiiraamaha oo dhan wuxuu ahaa B + illaa A-kala duwan dhammaan zipcode-yada.

Mudane Acevedo ayaa weydiiyay haddii ay jiraan wax caddeyn ah oo muujinaya inuu hoos u dhac ku yimid celceliska qeybinta GPA, iyadoo sannadkan guddiga ardayda la barbardhigayo sanadkii ka horreeyay. Marwo Hogan waxay sharraxday in sababta oo ah GPA ay metelayso waqtiyo kala duwan, ay adkayd in isbarbardhiggaas la sameeyo. Intaa waxaa sii dheer, guud ahaan GPA laguma soo koobin sannadkan tiro, halka sanadihii la soo dhaafay, GPA-yada ardayda lagu soo koobay tirada ugu dhow oo dhan. Marwo Skerritt ayaa intaa ku dartay in waagii hore, GPA aysan ahayn shuruudaha kaliya, sidaa darteed GPA-da ardayda  waa la yareeyn kari ama magdhabi kari dhibcaha qiimeynta. Waxay intaas ku dartay inay rajeyneysay in ardaydan ay ku guuleysan doonaan buundooyinka ay leeyihiin.

Mudane Contompasis ayaa wax ka weydiiyay go'aanka ah in aan la soo koobin darajooyinka. Marwo Lum waxay tiri in Kooxda Shaqada ay go'aansadeen inaysan koobin dhibcaha maxaa yeelay waxay rabeen inay yareeyaan xiriirka.

Diktoor Tung ayaa wax ka weydiiyay qeexitaanka qalafsanaanta xafiiska ee Dugsiyada Dadweynaha Boston Marwo Roberts waxay sheegtay in xafiiska tacliinta sare iyo madaxa iskuuladu ay si qoto dheer u eegeen qeexitaanka qalafsanaanta ee Dugsiga Daweynaha ee Boston(BPS), laakiin waxay sheegtay in Dugsiyada Dadweynaha Boston A'asa'asiga u ah Sinaanta Waxbarida ay hagayso shaqada hubinta qalafsanaanta tacliinta iyado taas awged qalafsananto tahay mid aqoon ahaan, caqli ahaan, iyo shaqsiyan caqabad ku ah, iyo sidoo kale barashada dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan waarta, khibrad barashada, shaqada koorsada iyo rajooyinka waxbarasho.

Diktoor Tung wuxuu tilmaamay farqiga qeexitaankan ee kan US News iyo World Report ay u adeegsadaan kala sareynta dugsiyada. Marwo Skerritt waxay cadeysay in markay kahadlayso adkeynta qalafsanaanta, inay aad uga fikirayso waxqabadka guud ee iskuulka, iyadoo lagu cabiraaaya sida guud ahaan iskuulada loo jaangooyo ama loo qiimeeyo waxqabad ahaan, marka loo eego nidaamka barashada dhabta ah.

Marwo Sullivan ayaa intaa ku dartay inay tahay su'aal muhiim ah in jawaab loo helo maadaama ay umuuqatay inuu jiro farqi udhaxeeya qeexitaanada kaladuwan ee qalafsanaanta waxayna rabtay inay hubiso in xubnaha howl wadeendada ay dhamaantood isku aragti yihiin. Mudane Contompasis wuxuu intaas ku daray in su'aasha muhiimka ah ay tahay: Sidee degmadu u cabirtaa waxa loo yaqaana qalafsanaanta?

Mudane Acevedo wuxuu xusuusiyey kaqeeb galayasha wixii uu ka sheegey jimcihii, Maajo 11-keedii, in erayga qalafsanaan, loogu talagalay erey bixinno badan oo ka-reebis ah iyo sida ay muhiimka u tahay in lala yimaado talooyin gelitaan ah oo labadaba ilaalinaya adkaynta dugsiyada ayadoo sinaan ah.

Marwo Sullivan ayaa waydiisay xubnaha inay fikir iyo fikrado ka qabaan shuruudaha.

Mudane Cregor wuxuu weydiiyay inti ay la xiriiraan Guddiga Dugsiga ee ku saabsan su'aasha qalafsanaanto, markii ay sidoo kale dib ula eegaan iyaga, qaybta axdiga halkaasoo ay tixraacayaan kala duwanaanta, ayna hubinaayaan inay la jaanqaadayso waxa Guddigu iskuulka ka filayaan Guddi Hawleedka inay dib u eegaan. Wuxuu kaloo sheegay inuu filayo inuu jiro loolan xagga sharciga ah oo macnaheedu yahay inay ku dadaalaan sidii ugu wanaagsanayd Howl-wadeenada inay ahaadaan kuwo taxaddar leh runtiina og xeerarka aasaasiga ah. Wuxuu kaloo sheegay inay u baahan yihiin inay hubiyaan

in, qorshe kasta oo ay la yimaadaan in ay ku xiran tahay dib-u-eegis xilliyeed ah oo lagu dari karo ra'yi-celinta ardayda sida waayo-aragnimadooda ku saleysan jinsiyadooda, xaafaddooda, iyo xaaladdooda dhaqan-dhaqaale.

Marwo Lum waxay isweydiisay bal inay u isticmaali karaan sharciga ku meel gaadhka ah jaangooyooyin ay wax ku bilaabaan, kuna hagaajiyaan.

Marwo Skerritt waxay sheegtay inay kufaraxsaneen adeegsiga siyaasada ku meelgaarka ah bilaaw ahaan iyadoo la abuuray helitaan laa'an xogaha gaar. Waxay sheegtay inay xiiseyneyso moodooyinka sida Detroit, halkaas oo codsadayaashu ay awoodaan inay codsadaan shaqsi ahaan tooda, balse arrimo dheeraad ah iyo tixgelin ku saleysan xaaladdooda gaarka ah. Waxay sidoo kale sheegtay inay jeclaan lahayd inay eegto nooca iskuulka ee ardaygu dhigto, maxaa yeelay qaar ka mid ah sinaan la'aanta ku xeeran sida diyaarinta imtixaanka iyo agabka, badanaa waxay aad ugu xiran yihiin agabka iyo xaalada iskuulada.

Mudane Acevedo wuxuu sheegay inuu sidoo kale ka taxadarayo adeegsiga siyaasada halka sano ee aasaasiga ah, gaar ahaan talooyinka la soo gudbiyay ee ku saabsan dastuurka maxaa yeelay waxay ahaayeen qeexitaan, baaxad ahaan kooban. Uma maleyneynin inay cadahay in isla siyaasadani ay meel mari doonto dastuurka lameel mariyaymudo dheer. Wuxuu kaloo u maleynayay inay xiiso laheyd in la fiiriyo beelihii si ula kac ah u meelmariyay siyaasado fog.

Marwo Grassa ayaa sheegtay inay u maleyneysi in xubnahan looga baahan yahay inay yeeshaan wada hadal dhab ah oo ku saabsan inay isticmaali doonaan\ isticmaali karin, qiimeynta talooyinka.

Marwo Lum waxay sheegtay inay maqashay qof soo jeedinaya in loo isticmaalo darajo bixinta maadooyinka in ka badan inta loo isticmaala xisaabta iyo Farshaxanka Luuqada Ingiriiska (ELA).

Marwo Skerritt waxay waydiisatay xubin kasta oo aan kula talin karin qiimeyn ahaan inay ka mid tahay siyaasada, inay fadlan soo jeediyaan xog kale oo laga heli karo dhamaan codsadayaasha, taasoo matali karta waxqabadka ardayda heerkooda ama u dhow heerka fasalka ka hor inta aan la dhigin dugsiyada.

Marwo Sullivan ayaa kugabagabeysi weydiinta xubnaha inay ka fikiraan hadii ay dejinayaan siyaasad la doonayo in laga reebo, ama lagu daro ardayda, maxaa yeelay, tu' sy ahaataba siyaasada ay damacsanaayeen inay naqshadeeyaan, waxay la socodsiinaysaa noocyada shuruudaha ee ay ku talin karaan in lagu daro sharciga. Waxay sidoo kale ku dhiirrigelisay xubin kasta inay si shaqsi ah u dejiso siyaasad ka caawisa inay hagto fikirkooda shaqsiyeed iyada oo siineysa wax ay ku shaqeeyaan marka ay koox ahaan isugu yimaadaan.

## Faalada Guud ee Dadweynaha

- Travis Marshall, oo degan magaalada Roslindale, waalidka Dugsiga Hoose ee Bates, ayaa ka markhaati kacay imtixaan iyo u hiilinta sharci u adeega dhammaan ardayda Boston.
- Jane Zhou, oo deggen West Roxbury, waalid hore ee Dugsiyada Dadweynaha Boston, waxay markhaati ka dhigtay in la ilaaliyo heerarka tacliinta sare ee imtixaanaadka dugsiyada.
- Alan Tian, deggan West Roxbury, waalid ah, ayaa ka markhaati kacay shuruudaha numbarada zip.
- Alan Tian, deggan West Roxbury, waalid ah, ayaa ka markhaati kacay shuruudaha numbarada zip.

- Steve Yang, deggana West Roxbury, waalid, ayaa ka markhaati kacay shuruudaha nambarada zip.
- Rachel Miselman, oo degan Bariga Boston, ahaan jiray arday Dugsiyada Dadweynaha Boston, ayaa markhaati ka dhigtay waxyaabaha laga walwalsan yahay ee ku saabsan hirgelinta nambarada zip qorsheyntooda.
- Sarah Grandfield, deggen West Roxbury, waalid ah, waxay ka markhaati gashay qaabka ay Dugsiyada Dadweynaha Bostonu soo bandhigtay xogta aqbalitaanka, iyo isku dhafka kooxda howl-wadeenada.

## Faallooyinka Xiritaanka

Mudane Contompasis wuxuu xusuusiyey xubnaha Howl-wadeenada inay yeelan doonaan afhayeen kulanka jimcaha, 21ka Maajo oo ay sii wadi doonaan dooda ku saabsan shuruudaha.

## DHAMMAAD KULANKA

Abaare 7:04 habeenimo, Guddigu wuxuu u codeeyey si aqlabiyad ah, liis ahaan, in dib loo dhigo kulanka.

Markhaati:



Lena Parvex
Kaaliyaha maamulka